



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisa, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Diisambar 21, 2020

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS (Hay'adaha Maamulka Kiiska: fadlan si ballaaran u wadaaga, oo ay ku jiraan daryeel bixiyayaashu. Daryeel bixiyayaasha waxaa la ogeysiiyaa iyada oo lagu saleynayo email la geliyo eXPRS)

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Wajiga 1 ee Tallaaka COVID-19

Xafiiska Guddoomiyaha Gobolka iyo Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa dhawaan soo saaray [Wajiga 1a ee Qorshaha Qaybinta iyo Isku xigsiinta](#) oo loogu talagalay tallaalka COVID-19.

Imaanshaha tallaalka ee Oregon wuxuu calaamad u yahay ka gudubka dhibaato, iyada oo aanu dhammaanteen rajeynayno in aanu joojino faafida cudurka COVID-19. Iyada oo sababtu tahay tallaalku oo aan si aad ah loo heli karin, Oregon waxay qaaday hab wajiyo loo kala qaaday oo ku aadan qaybinta. Kooxda 1a ayaa ah kuwa u horreeya ee helaya tallaalka ka jira Oregon oo ay ku jiraan shaqaalaha isbitaalada, xarumaha daryeelka muddada fog, goobaha yar yar ee lagu urursan yahay iyo dadka kale ee halista sare ugu sugan natiijooyin xun oo ka dhasha cudurka COVID-19.

Dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) iyo daryeel bixiyayaashooda ayaa ku jira Wajiga 1a. Wajiga 1a dhexdiisa, waxaa ku jira afar kooxood. Dadka qaba I/DD ee ku nool goobaha daryeelka oo la isku urursan yahay (guryaha koox ahaanta loo degan yahay iyo guryaha daryeelka ilmo korsiga) iyo shaqaalaha ku nool goobahaasi ayaa tirsan kooxda labaad oo ku jira Wajiga 1a. Dadka kale ee qaba I/DD, iyo sidoo kale waalidiinta/mas'uuliyiinta dhashay carruur caafimaad ahaan nugul ama shaqaalaha taageerada ee loogu talagalay goobo guriga dhexdiisa ah

(oo ay jiraan Shaqaalaha Daryeelka Shakhsiyeed) ayaa ka tirsan kooxda saddexaad ee Wajiga 1a. Ogow in tallaalada hadda jira ee COVID-19 aan loo oggolayn carruurta.

Si kastaba ha ahaatee, Oregon ma helin tallaal ku filan si loo siiyo dhammaan dadka mustaqbalka helaya Wajiga 1a. OHA waxay dejinaysaa qorshayaal iyada oo tallaal badani uu imaanayo bilaha soo socda. Shaqaalaha isbitaalada, kalkaalisoooyinka xirfada leh iyo xarumaha daryeelka dhanka xasuusta ayaa ah kuwo u horreeya ee helaya tallaalka ka jira Oregon.

Tallaalku wuxuu ina siiyaa rajo ah in cudurka baahsani uu joogsan doono, laakiin ilaa taasi laga gaarayo, waxaanu u baahanahay in aanu sii wadno tallaabooyin dhanka badbaadada ah si aanu uga ilaalino in fayrasku faafdo: xiro maaskaro, ka fogow dadka kale, gacmahaaga dhaq, isla ilaali isku imaanshaha oo guriga joog marka aad jiran tahay.

Weli ma ogin taariikhda marka dadka qaba I/DD, qoysaskooda iyo daryeel bixiyayaashooda ay heli doonaan tallaalka. ODDS waxay sii wadi doontaa in ay la socodsiiyo daneenayaasha, hay'adaha maamulka kiiska iyo daryeel bixiyayaasha si ay wax uga warqabaan marka aanu ogaano waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan qaybinta tallaalka iyo waqtiyada loo qabtay.

Su'aalaha waxaa si toos ah loogu diri karaa:

COVID19.Vaccine@dhsosha.state.or.us

Bogga internet-ka ee OHA ee tallaalka guud ee COVID-19 (isku diiwaan geli helida macluumaadka cusub) waa: <https://covidvaccine.oregon.gov/> iyada oo bogga internet-ka ee tallaalka daryeel bixiyaha u gaarka ah uu yahay:

<https://www.oregon.gov/oha/PH/PREVENTIONWELLNESS/VACCINESIMMUNIZATION/IMMUNIZATIONPROVIDERRESOURCES/Pages/COVIDvaccine.aspx>

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo
[*wax ka ogow website-keena.*](#)

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriiir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.